
# ARAGTIDA DR. ABIY EE DHISMAHA ITOOBIYADA CUSUB *"GENERATION MEDEMER"*




Buuggii ugu horreeyey ee aan akhriyo sannadkan 2024-ku waa Buugga *"Generation Medemer"* ee uu qorey Dr.Abiy (Ra'iisul wasaaraha Itoobiya), oo la daabacay 2023-kii, kaas oo qoraagu ku dhisay kuna qurxiyey afkaartii uu ku iba furey buugiisii hore ee "*Medemer*" oo 2019-kii soo baxay. Buuggaas hore oo aan akhriyey 2021-kii kana jeediyey mid ka mid ah madalaha buuggaagta lagu akhriyo. Buugga hore qoraagu waxa uu kusoo bandhigay hannaan ka duulaya sida dhaqanka Itoobiyaanka iyo kan Afrikaanka loogu dub-dhigi karo xallinta dhibaatooyinka daba dheeraaday ee haysta Itoobiya iyo qaaraddan

Afrikaba, taas oo ku salaysan dhaqanada, iyo axdiyada qaaradda si loo gaadho nabad waarta, barwaaqo iyo horumar.

Ujeedadayda in aan lafaguro buuggan waxa weeye in aan si toolmoon u furfuro afkaarta qoraaga iyo doodihiisa oo aan u halbeego macquuliydooda, ficilgalnimadooda iyo suurtagalnimada in ay xal u noqdaan dhibaatooyinka xilligan haysta waddanka Itoobiya iyo Gobolkan Geeska Afrika iyo sidoo kale in ay u noqon karaan wadiiqadii lagu gaadhi lahaa nabadda, barwaaqada iyo xasiloonida warkhtiga dheer lagu badhaadho. Qaybta danbena waxa aan kusoo koobay tobanka cutub ee uu buuggu ka koobanyahay.

Aragtida xaddaaradeed ee qoraagu waa in Itoobiya iyo Qaaraduba ay iska furaan xadhkaha "afkaarta qalaad ee dibadda uga yimiday." Isaga oo ku dhiirigelinayaa dadkiisu in ay xalka dhibaatooyinkooda ka raadiyaan dhaqankooda hodanka ah, caadooyinka san, hal-abuurnimadooda dhaqan; iyaga oo isaga fogaayana afkaart qalaad ee lasoo amaahday. Waxa uu ku dooday in dadka qaaradani la qabatimeen afkaan aan xeru-dhalan ahayn oo aan weliba noloshooda xidhiidh la lahayn, fahamka ay ka haystaana uu aad u liito, waanay la qabatimeed iyaga oo afkaartaasi aan innaba xallin mashaakilaadkii haystay waddanka Itoobiya iyo qaaradda toona. Soo waarididan indha la'aanta ah iyo adeegsiga afkaartan qalaad waxa ay inoo gaysatay dhibaato ay iska dhaxleen fac ka fac oo aanu facna isku deyin in uu helo xal ay iyagu leeyihiin oo ay boogaha dhibaatooyinkooda ku dhaydaan.

Kelmadda "Medemer" waa erey Amxaari ah oo macneheedu yahay isku imaatin, balse qoraagu waxa uu ku macneeyey "wada shaqayn" isaga oo ku sharaxay in uu yahay curin asaasi ah oo dib loogu eegayo waddanka Itoobiya xilligan casriga ah. Waa himilo bulsho oo ku dhisan nidaam iskaashi iyo tartan isku dheelitiran.

***'Generation Medemer'*** sida qoraagu ku sifeeyey waa "hab-fikir cusub' iyo nidaam "aynu ku dhayayno dhaawacyadeennii, ku daaweynayno xanuunadeenii, kuna xallinayno dhibaatooyinkeenii". Waxa uu ku sheegey hab-fikirkiisan Medemer in uuna ahayn baadhid falsafadeed ama iska haloosiyid balse ay tahay go'aan iyo haltebin dhab ah oo xal loogu raadinayo mashaakilaadka Itoobiya haysta. Raadinta jawaabta iyo aragtiyaha uu qoraagu soo bandhigay waxa ay xiganayaan shakhsiyado kala duwan iyo sahamin xeeldheer taas oo cuskanaysa nimaadka hay'adaha Afrikaan ka ah sida dhaqamada soo jireenka ah, diimaha iyo caadooyinka qaaradda. Curintani waxa ay meesha ka saaraysaa aragtihii ku dhisnaa qaybinta bulshada ee qoomiyadda, midabka iyo kala qoqobka ku dhisnaa.

Adeegsiga fikradda *Medemer*, qoraagu waxa uu uga gol-leeyahay in uu sharaxo siyaasad bulsho oo ku dhisan tognaan, iskaashi (iyada oo laga koraayo lagana dheeraanayo siyaasadda burburinta ah ee natiijadiisu tahay in sagxadda la wada taabto) iyo tartan. Dhextaalka fikraddu waa isku duubni iyo wadajir kasoo bilaabmaya heer shakhsi, kooxeed, hoggaamiyayaal iyo haya'adaha si loogu shaqeeyo si firfircooni leh, wax ku ool ah, oo hal-abuurnimo looga shaqeeyo hab-dhaqanka wanaagsan iyo danta guud.

Qoraagu waxa uu ku doodayaa fikradan Medemer (is-kaashi), in ay soo saarayso xaddi badan oo tamar dhaqaale, bulsho iyo siyaasadeed ah; taas oo ah dhaxal ay leeyihiin bulshoweynta Itoobiya iyo dadweynaha qaaraddan Afrika. Afkaarta qalaadna waxa uu dhiirigelinayaa in la iska dhaafo oo aan lasoo waaridin.

Qoraagu waxa uu rumaysanyahay in aanu isbedel waaraa ku imanahayn kacdoonno xad-dhaaf ah ama isbeddello rabshado wata oo mar uun soo butaaca, balse uu ku iman karo oo keli ah nidaam barasho oo mabda' iyo aqoon ku dhisan oo jiilba jiilka xiga u gudbiyo lagu keeno is bedel. Qoraagu waxa uu ku dooday in "*Dhismaha qaranku yahay taxane ku bineysan aqoon iyo*

*xadaarad oo jiilba jiil ka xiga ku tallaalo*." Qaran ku waa maxsuulka isku xidhnaanta jiilal kala danbeeyey iyo nimaadka wada xidhiidh kooda (wareysi iyo wacaal) oo tayaysan. Guulaha iyo guuldarrada qaranna waxa go'aamiya dadaalada jiilasha kala danbeeya iyo ficiladooda ay ku kacaan xilligaas ay joogaan, taas ayuunba dhasha guul ama guud darro.

Jiil kastaa waxa uu leeyahay luuqadiisa iyo habka haltebintiisa gaarka ah ee xubinihiisu ku wada xiriiraan kulana xidhiidhaan faca iyaga ka danbeeya. Halka inta badan isu hal-tabinta nuxurkeedu uu lumo jiilasha dhexdooda ama uu abuuro is-faham darro ama uu khalkhaliyo maxsuulkii ama nuxurkii fariinta. Yoolka guud ee fikradda 'Medemer' waa in la derso surma seegtooyinkii, guuldarrooyinkii, waxqabadkii, iyo guulihii jiilashii hore oo la dhiso Itoobiya cusub (*New Ethiopia*) taas oo ku naaloota horumar loo dhanyahay oo ku dhisan nabad iyo barwaaqo.

**GABAGABADII LAFAGURKA**

Buugan, "Generation Medemer, (*jiilkii iskaashaday*)" Ra'iisal Wasaaraha Itoobiya waxa uu si furan usoo bandhigay wax aynu u qaadan karno ajandihiisa Itoobiyada cusub, iyo barnaamujkiisa hogaamineed. Gogoldhiga buugga waxa uu sameeyey odhaah ka turjumaysa jidka uu u marayo dhismaha Itoobiyada cusub iyo jidka uu ugu talogalay in uu ku hoggaamiyo dhalinyaradiisa waxa uu ku sheegey *"jidkan ifaya ee horumarka*".

*" Jidka Medemer waxa uu ka dhashay safarkii noloshayda... jidka Medemer waa shaqo loogu talogalay in ay isu keento iskaashiga dhawr fac oo kala duwan... Medemer waa miraayadda aan ku fiirsanayno mustaqbalka innaga oo isku keeneyna awoodda faca imika jooga oo dhisayna kartida jiilka soo socda, kana taxadireyna khaladaadkii ay galeen jiilashii inaga horreeyey."*

Jiilkan Medemer waxa uu ku sheegay Dr. Abiy in uu yahay jiilkii qaban lahaa shaqada culus ee sare u hinjin lahaa waddanka Itoobiya kana saari lahaa

saboolnimada oo u horseedi lahaa barwaaqada, isaga oo AFAR u kala qaybiyey (cutubka 2, b. 36-51) jiilashii Itoobiya soo marey kasoo bilow 1896-kii kuwaas oo kala ah: Jiilkii xagjirka ahaa (*Conservative Generation*), jiilkii Riyada (*Dreamer Generation*), jiilkii qalbijabay (*Disillusioned Generation*) iyo jiilkii anbaday (*Alienated Generation*).

Waxa ii soo baxday in qoraagu aad uga taxadirey in uu ku xukumo jiilashii hore khaladaadkii badnaa ee ay galeen; taas bedelkeedana uu qiro guulihii ay soo hooyeen ama ay dhaxalka uga tegeen. Marka la eego (cutubka 7, b. 157-162) waxa uu ku faaqidey fikraddiisan cusub ee 'Medemer' in ay tahay qaacidada lagu dhisi karo jiil cusub, isaga oo ku dooday in astaanta Itoobiyaannimadu ay noqoto mid isu keenta shucuubta qaaradda Afrika ayna ku faanaan. Waxa uu ku booriyey dadkiisa in ay sida qudhaanjada oo kale isugu duubnaadaan, iyaga oo aaminsan in isku duubnidu ay tahay tiir adag oo aan weligeed la jebin, dhibkastana si sahlan loogaga gudbi karo. Dhinaca kale (cutubka 10, p. 267-270) qoraagu waxa uu soo jeediyey in ay cadaatay in quwadihii reer Galbeedka ee uu hormuudka u ahaa Mareykanku ay ka jeesteen Bariga dhexe iyo Geeska Afrika, taas oo ah fursad ay shucuubta gobolladani ku raadsan karaan fursado kale oo ay jilayaasha kale kula xulafoobi karaan. Waxa uuna ku tirtirsiiyay shacabka Itoobiya iyo jiilkan cusub (Medemer) ee uu dhisayo badhaadhahooda iyo mustaqbalkoodu ku jiro in ay wax la qabsadaan wadamada bariga dhexe iyo Badda Cas oo ay u noqon karaan ishii ay cuntadooda usoo doonan lahaayeen.

Si kasta oo ay noqotaba, culimada ku takhasustay daraasadaha Hoggaamintu waxa ay yidhaahdaan guusha hoggaamiyuhu waxa ay xidhantahay in uu isla helo, xaalad, duruuf iyo ujeedo, halka gaadhista ujeedo kastaana ubaahantahay adkaysi, isku duubni iyo adeeg bixin dhab ah si looga gun gaadho. Waxkasta oo dhibaato ah oo qoraagu la kulmay, buugani waxa uu u muuqdaa in uu yahay dhabadii hogaamintiisa ee Itoobiyada cusub ku hagayay oo uu halkan inoogu soo gudbiyey. Waxa aan ku boorrin lahaa qofkasta oo Siyaasi ah, (siiba kuwa gobolkan geeska iyo qaaradda),

diblomaasiyiinta, dhallinyarada, cilmi baadhayaasha iyo saxaafaduba in ay akhriyaan buuggan.

**Waxa ay ila tahay,** in aragtiyahan iyo qorshayaashan nayaayirka iyo ididiiladu ka buuxdo ee dib udhisidda Itoobiyada cusubi uu noqon karo oo keli ah tallaababada kowaad ee isbedelka uu waddankani u baahanyahay. Itoobiya waxa luga kaga maran dhibaatooyin waa weyn oo xididdo dhaadheer leh oo aan lagu xallin karahayn dadaalka hoggaamiye keli ah, halkii laga yaabo in ay wax ka qaban lahaayeen koox haldoor ah (*group of elites)* oo la yimaadda afkaar isbedel oo nidaam xasilloon ku socota; kanasoo bilaabanta hoos illaa ay gaarto qof-qof, koox-koox iyo nidaamka dawliga ah, taasna waxa ay u baahantahay in ay qaadato wakhti ay ku qaangaarto iyo qori isu dhiib xasiloon. Wadajirka, iyo habdhaqanka akhlaaqiyaadka iyo qiyamka wacan ku dhisan sida wada shaqayn, iskaashi, isu-tanaasul, dulqaad, adkaysi iyo isqadarin ayaa noqon kara shiidaalka iyo tamarta dhismaha jiilka isbedelka xasiloon horseedi kara.

**Qaab dhismeedka Buugga**

*Buuggani waxa uu ka koobanyahay saddex qaybood iyo toban cutub.*

- **QAYBTA KOWAAD:** (Saddex cutub) oo ka hadlaya afkaarta iyo qulqulka jiilasha. Waxa uuna qoraagu ku soo bandhigay aragtidiisa ku saabsan jiilka uu dhisayo ee uu ubixiyay "Generation Medemer" *(jiilka wadajire) isku duubnida)*
- **QAYBTA LABAAD:** (Saddex cutub) "jiidka jiilasha iyo jabad galkooda" qoraagu waxa uu qaybtan ku xardhay aragtidiisa ah sifaynta shakhsiyadda jiilka, astaamaha iyo kobcinta jiilasha si ay u yeeshaan muuqaal aqooneed, Sharaf iyo akhlaaqiyaad.

- **QAYBTA SADDEXAAD :** ( Afar cutub), qoraagu waxa uu diiradda ku saaray " Jiilka wadajire/Medemer Generation) waxaanu falanqeeyey Medemer oo ku sifeeyey qaacido qaran lagu dhiso. Cutubka 10-naad (Bariga dhexe), waxa uu ku lafagurey siyaasad goboleed iyo sahamintiisa uu farta ugu fiiqay jiilkiisan Medemer in naruuradu ka xigto dhinacaas iyo bariga dhexe iyo Badda Cas.

In kasta oo aan jeclaan lahaa in aad wada akhridid buugga oo dhan hadana halkan waxa aan kuugu sii biniixinayaa qurubyo koob kooban oo aan kasoo qaaday cutub yada qaarkood oo si kooban sawir kaaga siin doona aragtida buuggan.

1. **CUTUBKA 1AAD- QEEXIDDA IYO FALKIDDA JIILKA:** Qoraagu waxa uu ku qeexay jiil iyo sameeyayaasha jiilka waxa aanu yidhi "Jiilkastaa iyaga ayaa go'aamiya dabeecadaha iyo dhaxalka ay ka tegayaan guul iyo guuldarraba, waana khibradda nolosha laga barto jidka lagu gaadho guusha iyo guuldarradaba." Jiilashu waa qori isu dhiib lagu kala dhaxlo jidka lagu abuuro nabad, dawladnimo, horumar iyo baraaqo. Si ka duwan kacaannada kale, fikradda Abiy ee 'Medemer' waxa ay ku bineysantahay halgan bulsho oo ku salaysan ka ruqaansiga saboolnimada

iyo u guuridda barwaaqada. Maxsuulkeeduna maaha uun bulsho xasiloone waa bulsho xor ka ah nacayb, kala qaybsanaan, dhibaatooyinka iyo nugaylka. Runtuna waxa weeyey in sahaminta fikraddan uu Abiy saldhig uga dhigay 'is jacayl, wadajir, iyo isku duubni bulsho'. Waxa uu ku dooday in hab-dhaqannada iyo caadooyinka ay bulsho joogtayso illaa ay dhawr jiil u kala gudubto ay aakhirka noqdaa qiyam qaran (national values), taas oo ka dhigan in qiyam qaran yahay wax aan is bedelin oo lagu garto ama baadisooc u noqda qarankaas. Ugu danbayna qoraagu waxa uu si adag isu barbar dhigay jiilka wadajire/Medemer iyo jiilalka reer galbeedka.

2. **CUTUBKA 2AAD- DABEECADAHA IYO XIDHIIDHADA JIILASHII ITOOBIYA EE WAKHTIYADAN DANBE:** Waxa cutubkan ka muuqata in qoraagu uu si weyn u fahamsanyahay una dersay jiilashii soo maray Itoobiya. Doodiisa marka la eego, jiilkan cusubi ama wuu saqiiraa ama waxa uu ileyska u noqdaa dhaxalkii jiilkii ka horreeyey oo wuu kobciyaa. Taariikh ahaan waxa looga bartay in jiilasha Itoobiya mid ba kii ka horreeyey dhaleeceeyo, kuna tilmaamo rajo xume badaw ahaa, wallow ay marmarka qaar dhacdo in lagu faano guulaha jiilal hore. Abiy waxa uu ina siiyey tusaale uu hoosta ka xarriiqay sida ay hallowga u ahayd aragtidii Marxist iyo caqabadihii is dabajooga ahaa ee ay Itoobiya kala kulantay iyo dabcan aduunyadii kalee qaadatayba. Waxa uu ku sheegey in ay noqoto uun cashar aduunyadu soo aragtey oo khibrad ka korodhsatay, afkaarta xigtaana noqdaan qaar xaqiiqada iyo dhaqanka ku dhisan. Waxa kale ee uu xusay in ay jiraan shakhsiyaad isaga tallaabay dhawr jiil oo mid kasta la jiley iyaga oo aragtiyo isku mid ah wata.

Marka laga tixraacayo sida uu Abiy u dhigay jiilashii soo maray Itoobiya

xilligan casriga ah waxa uu u qaybiyeye afar jiil oo sida uu ku sheegay u qaybsanaa afar jiil/fac oo mid kastaaba duruufihiisa lahaa:

* **JIIL KII XAGJIR KA AHAA:** Guushii Adwa ee 1896 kadib, jiilkani waa kii uugu horreeyey ee la kulmay xilligan casriga ah (Modernity), xilliyaddii ugu horreeyey ee dugsiyada, Hudheelada, baabuurta, filimada, diyaaradaha iyo wargeysyada. Jiilkan qiyamkiisu waxa uu ahaa Itoobiyaannimo iyo wadajir. Waxa ay isku dayeen in ay isku eekeysiiyaan Jabaaniiska oo isku dheelitirey dhaqankii iyo farsamadii casriga ahayd. Xagjirnamadu waxa waxay ka ahayd in ay ilaaliyaan dhaqanka, iimaanka, geesinimada, iyo qabka Itoobiya iyaga oo hadana rabay in ay wax ka qaataan farsamooyinka casriga ah iyaga oo qiyamkoodi haysta.
* ***JIILKII HIMADALA:*** badhtamihii qarnigii 20-aad jiilkan waxa loogu yeedhijiey caruurtii 1960-kii, dugsiyada casriga ah, warbaahinta iyo afkaarta iyo dhaqamada qalaad ayaa saamayn ku yeeshay jiilkan. Jiilkii shuuciga ahaa ee loo yaqaanay dhaqdhaqaaqii ardayda iyo kacaankii xarumihii hanuuninta ayaa ahaa waxyaaba gaarka u ahaa jiilkan. Waxa ay rabeen Itoobiya oo dimuquraadi ah, balse waxa ay dhex muquurteen mawjado dhiig badani ku daatay, malaayiinna ku dhaawacmeen, kumanaan kalena dibadda u masaafuriyey. Qoraagu waxa uu ku dooday in dhiiranaanta, kartida iyo geesinnimada jiilkani ahayd wax aad loogu riyaaqay "*Maadaama jiilkani si halyaynimo ah ay uga difaaceen gobannimada waddanka weerarkii uu ku soo qaaday Siyaad Barre.*"
* **JIILKII QALIBIJABAY:** Jiilkan kala daadsanaa waxa uu ku soo beegmay saddexdii toban guuro ee ugu danbeeyey qarnicii 19-naad. Markii ay dhacday dawaladdii Dhergiga iyo Hantiwadaaggiiba. Jiilkani waxa uu usoo joogay soo ifbixii xilligii qoomiyadnimada. Qalbijabku waxa uu ugu dhacay sababtoo ah dhiciddii hantiwadaagga, baabi'intii nafhuridiisa, iyo qalaasihii siyaasadeed ee waddanka soo foodsaaray. Jiilkan waxa dhibay isku dhacyo diimeed, qoomiyadeed iyo hoos u dhicii

hanka Itoobiyaannimada. Jiilkani waxa uu waayay ujeedadii siyaasiga ahayd ee ay u jireen iyaga oo noqday kuwa kala daadsan oo niyad jabsan.

* **JIILKII ANBADAY** (Alienated Generation)**:** jiilkan kan afraad, waa jiilkii lagu naanaysi jirey "jiilkii-kunka sano" waxa ay ku kacaameen siyaasaddii ku dhisnayd kala qaybsanaanta. Jiilkani waxa ay ka rabeen waddankooda wax uuna siin karin, waxa ayna door bideen in ay tacabiraan (dibadda aadaan) markii waddankoodii ku guuldarreystay in uu ka jawaabo baahidooda. Abiy waxa uu ku dooday jiilkani in ay rabeen in ay heleaan xuquuqdooda iyaga oo aan fahmin waajibaadka iyaga saaran ee waddankoodu ka rabo.

3. **CUTUBKA 3AAD: FAHMIDDA IYO HELIDDA AQOONTA LAGU DHISO JIIL-** qoraagu waxa uu dib u milicsaday dhibaatooyinka daba dheeraaday ee Itoobiya iyo dhaxalka ay kaga tagtay waddanka ( tognaan iyo tabnaanba) ee noocyada badan leh, kuwaas oo ay ka mid yihiin 'Fikraddii hantiwadaaga ee Marxist' (*Marxist socialist ideology*) taas oo kasbatay dhegeystayaasheeda xamaasadaysan 1960-naadkii. **Xagjirnimada (*radicalization)*** *taas oo kasoo dhexbaxday afkaarihii xagjirka ahayd* ee siyaasadeed, bulsho iyo diimeed iyo fikraddii **Kala qaybinta (*polarization)*** Waa aragti caqli badnaan iyo dhabnimo ku dhisan taas oo kuwa wadaaga fikraddani ay weli ku kala duwanyihiin afkaaro yaryar oo kale iyaga oo ku wada jira wadaagga fikraddan. Qoraagu waxa ku dooday soo if bixiddii xagjirnimada oo abuurtay saddex caqabadood si ay wax uga bedesho waddanka Itooiya oo ay ka mid yihiin b).Xagjirnimo, t).dhaqan siyaasadeed itaaldaran, iyo J) xasilooni daro siyaasadeed . Qoraagu waxa uu ku adkaystay in "liidashada sharcinimada dawladda" sida uu ku qeexay "sharci yadda" (legitimacy) in ay tahay kalsoonida ay ku qabaan dadka ku hoos nool dawladdaas in ay illaalinayso oo ay u taagantahay danahooda. Sharciyadda dawaladdu waa

kolba inta ay dadkeeda iyo haldoorkeedu ku kalsoon yihiin in dawaladdu danahooda u taagantahay. Waxa uu falanqeeyey in tartanka caalamiga ah, isbedelka tiknoolojiyadda iyo dagaallada heerka qarsoon "*gray-zone war" kuwaas oo ka mid ah waxa yaaba qaybta muhiimka ah ka qaata samaysanka jiil cusub. Marmarka qaar xaaladda qaaradan Afrika ku sugantahay ayaa saamayn taban ku yeesha ama adhaxdaba ka jebiya isbdelkii ay ahayd inu uu dhaco iyo horumarkii ba.*

Waxa uu ku dooday inkasta oo qaaraddani heshay madax banaanideeda tobanaan sannadood kahor, waxa ay ku jirtaa xaalad gumeysi qarsoon, waxaanu hoosta ka xariiqay in danaha Itoobiya iyo jiritaankeeduba ku xidhantahay halka ay ku taallo iyo gobolkan geeska Afrika iyo weliba gobolkan jaarka ah ee bariga dhexe iyo Badda Cas iyo doorkeeda ay ka ciyaarto tartanka caalamiga ah iyo quwadaha adduunyada.

Qoraagu waxa uu ku dooday "Itoobiya waa waddan ku abuurmay badda cas jenbigeeda xilliyo hore sidoo kalena aayaheeda iyo nolosheeduba ku xidhanyahay." Helidda Itoobiya ee marin biyood ka Badda Cas waxa uu sameeyey tartan adag oo taabanaya siyaasad goboleedka (Geopolitics). Markii aynu luminay Badda Cas doorkii Itoobiya ee siyaasadda gobolku hoos ayuu u dhacay. *"Siyaasiyiinta iyo dublamaasiyiinta dunidu waxa ay aaminsanyihiin in aqoonsiga awoodda Itoobiya ay ku xidhantahay doorka ay ka ciyaarto Badda Cas, taas baana keentay in aynu markhaati ka nahay xaaladda imika ka taagan gobolka."* Ayuu qoraagu ku soo afmeerey cutubkan.

4. **CUTUBKA 4: SHAKHSIYADDA, ASTAAMAHA IYO LAHAANSHA JIILKA-** qoraagu waxa uu ku bilaabay maahmaah Amxaari ah oo tidhaahda "Gurigu waa halka aad ku soo laabato, carraduna waa halka lagugu duugi doono" waxa uu is barbar dhigay

mashaakilaadkii ay soo mareen jiilashii kala duwanaa ee Itoobiya ee soo yaalkii hore, isaga oo ku dooday in laga soo bilaabo qarnigii 17-naad; xilligii Boqor Fasilede in Itoobiya ka mid ahayd quwadaha caalamiga ah, intii aanay go'aansan siyaasadii go'doonka "*closed-door policy*" si ay uga taxadiraan saamaynta dibadda kaga imanaysay ee ajaanibka.

*"siyaasaddani waxa ay ku idlaatay in ay go'doomiso oo soo laablaabto saamayntii Itoobiya ee dunida"* siyaasadani waxa ay saamaysay xidhiidhkii dibadda, ganacsigii iyo heliddii waxbarashada ee wadamada dibadda. Hoggaamiyayaasha Itoobiyana waxa lagu yaqaanay xikmadda iyo aragtida xidhiidhka caalamiga ah ee ay la leeyihiin quwadaha dunida si ay u ilaashadaa madaxbanaanida iyo gobanimada waddankooda.

Abiy waxa uu ku dooday in fikraddii Marxisam ay ahayd tijaabadii dhimashada ee Itoobiya, waxa ay kaga tagtay waddanka qas iyo in ay ka yaacaan dadkeedii aqoonta lahaa. *"Itoobiyaankii soo amaahday afkaatii xilligii dhaqdhaqaaqa ardayda ugu danbayntii wey ka carareen wadanka, waxa ayna uga tegeen wadankii in ay ku ciyaaraan kuwii aan waxba barani. Intaas ka dibna xasarado ayaa yimiday kuwaas oo keenay in xikmaddii lagu bedelo adeegsida xoog, musuqmaasuqiina loo arko taba cusub, caasinimadiina caqli badni waxaana lumay qiyamkii qaran ka, hay'adihiina wey baabe'een."*

5. **CUTUBKA 5-AAD: BARBAARINTA JIILKA IYADA OO LA ADEEGSANAAYO HUMMAAGGA AQOONTA IYO AKHLAAQIYAAD WANAAGSAN.** Abiy waxa uu ku dooday cutubkan gudihiisa in jiilkan cusub ee isagu horseedka ka yahay ee uu bixiyay 'Jiilka wadajire' in uu ka duwanyahay dhammaan jiilashii hore ee Itoobiya halka ay riixayso hal-abuurnimo, aqoon la tijaabiyay iyo akhlaaqiyaad sugan. Jiilkani waxa uu aaminsanyahay dib u habayn buuxda oo la sameeyo iyada oo la adeegsanayo cilmi, iyo hal-abuurka iyo aqoonta lagaga soo

dhaqaajinaayo Itoobiya saboolnimada laguna keenayo barwaaqada si looga dhigo Itoobiya mid ka qayb gasha tartanka caalamiga ah iyo hal-abuurka horumarka.

6. **CUTUBKA 6AAD: DHAXALKA JIIL KATAGO: FALSAFADDA HANKA SARE, IYO AFKAARTA WADANIYADAHA.** Qoraagu waxa uu falanqeeyey quruumaha kala duwan iyo dhalashooyinka iyo sida qolo kastaaba ugu faanto quruxda iyo qaayaha wadankooda, taariikh ahaan, dad ahaan iyo juquraafi ahaanba sida qudus oo kale. Waxa uu ku dooday in sirta farxadda, caafimaadka iyo cimri dheeraantu tahay wax dadka oo dhami jecelyihiin oo ku faraxsanyihiin, sida goobaha quruxda badan ee lagu damaashaado.

   Quruxda iyo qaayaha waddanku waa sababta abuurta hanka iyo xiisaha muwaadinku u qaado waddankiisa. Taa bedelkeeda xafiisyada wasakhaysan ee aan bilicda samayni waxa ay horseedaan shaqo xumida, iyo liidashada akhlaaqiyaadka midho dhalka shaqada ee waddan kasta, gaar ahaan Itoobiya. Qaybaha danbe ee cutubkan Abiy waxa uu ku tirtirsiiyay shacabka Itoobiya in ay muunad u yihiin wadajirka shucuubta iyo hanka sare ee qaaraddan Afrika, balse ay u badtahay in ay illawsanyihiin arrintan muhiim ka ah, halka uu ku canaantay shacabkiisa isaga oo yidhi *"Waxa aynu isku haysanaa raranka kala qaybsanaanta tobanaan sano."* Waxa uu ku adkeeyey jiilkiisan Medemer in ay ka fekeraan kala qaybsanaanta gudaha gadaasheed iyo wax yaabaha ka dhasha ayna ku baraarugaan waxyaabaha xoojinaaya wadajirka iyo isku duubnida shacabka Itoobiya iyo kuwa qaaraddaba. Waxa uu qoraagu ku gabogabeeyey cutubkan " jiilkan Medemer waa kii ka kori lahaa waxyaabaha yaryar ee bulshooyinka dhexdooda ee xoojin lahaa wadajirka ummadan; isu taagi lahaa meeleynta xuquuqda qaaraddani ku lahayd adduunyada".

7. **CUTUBKA 7AAD: MEDEMER QAACIDADA DHISMAHA JIILKA CUSUB-** Dr. Abiy waxa uu ku dooday in curin tiisan cusub tahay qaacido lagu dhisi karo jiil cusub, sidii uu ku sharaxay buugiisii hore waxa uu ku celiyey fikradiisii hore ee ahayd in isku dayga in lagu noolaado kalinimo aanay u ogolaanayn in aadanuhu ku badbaado ama ku raaxaysto nolol maalmeedkiisa. Waxa uu hoosta ka xariiqay in astaanta jiilkan cusub ee Itoobiya noqon doonoto isku duubni leh astaamaha Afrikaannimada iyo muwaadinnimo caalami ah. Dr. Abiy waxa uu ku fekerayaa in guusha jiilkan ay cariye u tahay dabeecadda *qudhaanjada* ee isku duubnimda iyo wadar ku wada badbaadidda. "*Wadajir bay qudhaanjo ku badbaaddaa*"

8. **CUTUBKA 8AAD: JIILKAN CUSUB EE MEDEMER- ASTAAMAHA, IYO CALAAMADAHA LAGU GARANAYO.** Qoraagu waxa uu ku sharaxay cutubkan astaamaha iyo muuqaalada u gaarka ah ee jiilkan cusubi kaga duwan yahay dhamaan jiilashii Itoobiya soo maray waxa uu yiri *"sebenkan jiilka medemer ee Itoobiya waxa uu u taaganyahay calaamadda midnimada iyo walaalnimada; oo leh dhaqan bulsho oo si wanaagsan u horumarsan iyo isku xirka gobolka oo xooggan."* Astaamaha uu cutubkan ku sharaxay waxa ka mid ah in jiilkani leeyahay rabitaan dhab ah oo barasho iyo ogaashaha macquuliyadda isu dheelitiran iyo afkaarta hanka sare ku dhisan ee leh hab-dhaqanka ixtiraama sharafta aadanaha ee leh dareenka dal jacaylka taas oo ku dhisan geesinimada iyo halgamaaga leh dhaqannada magaaladda ee xooggan iyo dhaqanka miyiga oo la jaan qaadi kara aduunyada casriga ah sida dhaqanka dimuquraadiyadda, doorashooyinka oo noqda wax ka mid ah nolosha bulshada. Waxa uu ku soo afmeerey cutubkan in Itobiya ku dadaali doonto in ay fahamto oo ay hirgeliso qaab-dhismeedka fikradda medemer iyada oo loo marayo dhismaha xidhiidho xooggan, midnimo,

iyo iskaashi taas oo noqon doonta astaanta u gaarka ah jiilkan una horseedi karta barwaaqo ay gaarto qaaraddu.

9. **CUTUBKA 9AAD: CURIYAYAASHA JIILKAN MEDEMER-ISTIRAATIIJIYAD IYO XIKMAD.** Cutubkan qoraagu waxa uu ku sharaxay falsafadiisan Medemer ee dhismaha jiil cusub iyo jidka lagu abuuro, sida dersidda khalalaadkii taariikhiga ahaa iyo qaadashada jiho istiratiijiyadeed sida xorriyadda saxaafadda, dib u habaynta mashaakilaadka waxbarashada oo la casriyeeyo, loo sinnaado oo la wada heli karo iyada oo wax laga baranayo tusaalaha wadamada bariga Eeshiya.
10. **CUTUBKA 10-AAD: BARIGA DHEXE- FURSADAHA AMA CAQABADAHA JIILKAN MEDEMER.** Qoraagu waxa waxa uu baadhitaan qoto dheer ku sameeyey mustaqbalka gobolkan Geeska Afrika iyo xaaladda ka taagan sida khataraha suurtagalka ah iyo farsamooyinka looga bixi karo. Qoraagga aragtidiisa waxa dhextaal u ah guul darrada awooddii reer Galbeedka ee keliya ahayd iyo soo ifbixidda awoodda China iyo suuqa cusub ee dhaqaalaha (BRICS), waxa uu sheegey in mareykanka iyo xulafadiisa reer galbeedku wajahayaan dhibaatooyin xooggan oo dhaqaale iyo meleteri isugu jira iyo quwado kale oo soo baxay oo awooddii aduunyada ee iyaga u xidhnayd kusoo biirey.

Waxa uu ku dooday in maadaama oo ku tiirsanaanta saliiddu ay hoos u dhacday, in Maraykanku uu ka weecday bariga dhexe iyo aagga Geeska iyo badda Pacific iyo Bariga fog si uu uga hortago saamaynta sii kordheysa ee Shiinaha. Taasna waxa ay abuurtay faarujin ka dhacday geeska Afrika iyo bariga dhexe oo ay ka faa'iideysteen cadawgii ay mudada dheer is hayeen reer Galbeedka. Cunaqabataynaha dhaqaale iyo ciqaabaha kale ee kaga imanayay waddamada qaaraddan Afkira ayaa kala fogeeyey iyaga iyo reer Galbeedka. Dr. Abiy waxa uu soo bandhigay xaalad dareenkeeda leh oo ku saabsan

barwaaqada, badhaadhaha iyo muhiimadda Itoobiya in uu ku xidhanyahay Bariga-dhexe iyo Badda Cas oo ay u noqon karto meel cunto ahaan quudisa oo istiraatiiji u ah, waana meesha keliya ee Itoobiya la wadaagi karto iskaashi dhaqaale iyo wadashaqayn siyaasadeed ayuu kusoo afmeerey.